



# Dayactirka Roosevelt

## The 2014 – 2015 Astaha Sanad Dugsiyeedka

Dayactirka Dugsiga Sare ee Roosevelt waxa uu ku socdaa sidii loogu talagalay sanad kadib wada shaqayn howlwadeenada, ardayda imika iyo kuwii hore iyo xubnaha bulshada si ay u qorsheeyaan oo u qaabeeyaan dugsiga. Qaabka dhismeedka dugsiga ayaa imika gudigu ansixiyey iyadii oo dib loogu eegi doono Bassetti Architects waraaqaha tan la xidhiidha bilowga howsha jilaalka 2015 halka la ebyi doono deyrta 2017.

### Maxaa xiga

#### Qabatinka Dhismaha

- Dhismaha Roosevelt waxaa loo waxaa loo gaba-gabayn doonaa wejiyo dhowr ah tan la xidhiidha xarunta, sidaa awgeed ardaydu waxa ay weli dhigan karaan fasalada RHS. Kulamada waxaa lagaga doodi doonaa sida ay u saamaynayso aradyda, qoysaska halka qoysaska derisak ah lagu wargelin doona tan la xidhiidha dugsiga <http://RooseveltBond.pps.net>

#### Qaabayntu waa horusocod

- Kooxdu waxa ay sii wadi doonaan horumarinta qaabkii la ansixiyey iyagii oo kadib diyaari doona waraaqaha dhismaha islamarkaana codsan doona ogolaashaha. Dhismaha waxaa loo mudeeyey in uu bilowdo dhamaadka sanad dugsiyeedka 2014-15.

#### Fursadaha Ardayda

- Kooxdu waxa ay qaban doonaan casharo ku saabsan ka hadalka iyo xirfada qaabaynta iyo dhismaha iyada oo barashada

farsamadana la heli karo xagaga soo soda (la hadal taliyahaaga shaqada). Kooxdu waxa ay sida oo kale isu duwi doonaan tusmooyin la xidhiidha horumarka dhismaha.

#### Qaabayntii oo meel mar ah

- In badan oo kale ka baro dhinaca kale ee warqadan gaadh ahaan qaabaynta dugsiga iyo fursadaha barashada ee la kordhiyey ee ardayda RHS iyo dhismayaasha la dayactiray, kolka lagu daro ikhtiyaarka xirfadaha cusub ee soo socda.

#### Hel akhbaartii u dambaysay

Isu diiwaan geli wargayska  
Dayactirka RHS:  
[RHSMOD@pps.net](mailto:RHSMOD@pps.net)

Aqalka Dayactirka Roosevelt:  
<http://RooseveltBond.pps.net>

Aqalka Dugsiga Sare ee:  
<http://www.pps.net/schools/roosevelt/>



### Xagee ayeynu wajahnaa:

#### XAGAA 2014 – JIILAAL 2015

##### Dhismaha Bilowga qorshaha

Kooxdu waxa ay hal-abuuri doonaan waraaqaha dhismaha iyaga oo inta kale gaadhsiin doonaa qorshaha qaybaha dhismaha tan u saamaxaysa ardayda in ay dhinac yaalaan inta lagu jiro dib u cusboonaysiinta.

#### XAGAA 2015 – DEYR 2017

##### Isbedelka Roosevelt

Ardaydu waxa ay Dugsiga Sare ee Roosevelt sii joogi doonaan saad dugsiyeedka 2015-16 iyo 2016-17 halka dhismuhu ka socdo.

#### DEYR 2017

##### Furitaanka Roosevelt Dib loo cusboonaysiiyey




Mustaqbalka Dhismaha. Ka Warqab. Ka Qaybqaado  
<http://Rooseveltbond.pps.net> • Phone-ka: 503-916-2222

[www.facebook.com/pps.homepage](https://www.facebook.com/pps.homepage) [@ppsconnect](https://twitter.com/ppsconnect)





- Barashada Guud/ Fasalada
- Goobaha guud
- PE/Ciyaaraha
- Barashada Shaqada
- Barnaamijyada Caawinta
- Farsaxanka Masraxa
- Farshaxaka Araga
- Adeegyada degdeg ah
- Maamulka / La Talinta /Adeegyada Ardayda
- Xarunta Warbaahinta/Maktabad
- Qaybaha Ciyaaraha/Agabka



### ROOSEVELT-KA CUSUB: MACLUUMAADKA

#### Maxaan qabanay 2013-2014

- Ku soo biiray kooxda Bassetti Architects & Lease Crutcher Lewis (Caqdiilayaasha)
- Mashruuca waxaa ka taliyey Roosevelt Design Advisory Group (DAG)
- Kulamadii loo qabtay bulshada, howlwadeenada iyo Aradyda
- Mudnaanta Bulshada oo la meel mariyey
- Tirada waxaa lagu sal-xidhay 1350 oo arday iyo 1700 oo ay suuragal tahay in ay mustaqbalka ku soo biidhaan
- La saadaaliyey barashada la xidhiidha shaqada
- Qaabayntii oo ay ansixiyeen gudiga dugsiga iyadii oo lagu daray qaabab dheeri ah ee fasalada.
- Qaabaytii guud iyo Qaybihii qaab-dhismeedka oo la dhamaystiray

- **Dhiifoon, leh goobo ku filan ee barashada:** Fasalo waawayn oo lagu xidhay technology-ga cusub. Dhinacyo barasho kolka lagu daro goobo qof qof iyo kooxda barashada ku haboon. Dhinacyada xafiisyada macalmiinta oo fududaynaya wadaaga iyo ka qayb qaadashada maamulka ardayda ee dugsiga oo dhan.
- **Bii'ada u wanaagsan:** Xarun dhexe oo ay aradydu isugu imaayaan dhismaha cusub ayaa iyadna loo adeegsanaa ujeedooyin farabadan sida barashada, kulamada iyo qaybo cunto.
- **Barashada shaqada:** (Eeg xaga hoose) Fursadaha cusub ee shaqada iyo mashaariicda barashada ku sal xidha min dhimsaha ilaa robotyada ee qorida iyo la hadalka dadwaynaha.
- **Ciyaaraha Fudud:** Qaybo cusub oo ciyaaraha kolka lagu daro sadex garoon oo mugoodu dhan yahay 1700 halka ay ka qayb qaadan karaan qoob ka ciyaarka, lagdita. Qaybaha orodka iyo kubada ee Roosevelt sidooda ayeey ahaan doonaan.
- **Ku xidhan bulshada:** Adeegyada ardayda iyo bulshada sida xarumaha caafimaadka, dhar-dhigashada, cutada iyo xarunta talinta waxaa la isugu geeyey qayb halka laga soo galayo ay ka baxsan tahay dugsiga oo loogutalagalay bulshada iyo saacadaha dugsiga kadib.
- **Keydinta muuqa taariikhiga ah:** Dhimaha asalka ah waxaa lagu qasban yahay in loo kaydiyo jilasha soo socda.
- **Farshaxanka:** Qaybaha farshaxanka waxaa qayb ahaa ka mid ah tiyatar casri ah, qolka music-ga iyo fasalada farshaxanka. Tiyatarkii asalka ahaa waxa uu noqon doonaa Maktabada cusub iyo xarunta warbaahinta, iyadii oo la isu geeyey technology-ga iyo buuga si loo baro xirfada cilmibaadhista xilligan lagu jiro waqtigii horumarka qalbka warbaahinta.
- **Amnigii oo la hagaajiyey:** Dhismayasha satellite-ka ee Kooban, In badan la adkeeyey goobaha laga soo galo.

### BARASHADA SHAQADA EE ROOSEVELT

Barashada Farsamada Gacanta	Bedka isku wareega ee dugsiga	Inta uu ka kooban yahay barnaamijku
<b>Warshadaynta iyo Qaababka Handasada:</b> Science, Technology, Engineering and Math (STEM)	<b>17,960 SF</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li style="width: 33%;">• STEM / Astaynta Lab #1</li> <li style="width: 33%;">• (6) Fasalada Sayniska</li> <li style="width: 33%;">• (6) Fasalada Xisaabta</li> <li style="width: 33%;">• Dhinaca kooxa yaryar</li> </ul>
<b>Ganacsiga iyo Maamulka:</b> Cadaalada Bulshada, Qoraalka iyo Ganacsiga	<b>3,600 SF</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li style="width: 33%;">• Xarunta Qoraalka iyo Daabacaada</li> <li style="width: 33%;">• Fasalada Qalabka Warbaahinta &amp; Daabacaada</li> <li style="width: 33%;">• Fasalada Saxaafada</li> <li style="width: 33%;">• Lab-ka Cadaadalada Bulshada</li> </ul>
<b>Farshaxanka / Maaweelada / Jimicsiga:</b> Qaabaynta Shaxanada / Hal-abuurka	<b>6,850 SF</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li style="width: 33%;">• STEM / Aste Lab #2</li> <li style="width: 33%;">• Dinaca Shaqada Dibada</li> <li style="width: 33%;">• Fasalka Farshaxanxa 3D</li> <li style="width: 33%;">• (2) Dhinacyada barashada kooxaha yaryar</li> <li style="width: 33%;">• Tiyatarka Madoow</li> </ul>
<b>Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada:</b>	<b>5,000 SF</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li style="width: 33%;">• Xarunta Kurayada Ubadka leh</li> <li style="width: 33%;">• Xarun Caafimaad</li> <li style="width: 33%;">• Xarunta La talinta Shaqada</li> </ul>
<b>Tirada Guud: 33,410 SF</b>		

